

Komishinka ku Howlan Arrimaha Bulshada



Su'aalaha Badiya La Weydiiyo

Guudmar

Iyadoo ay kordheyso taranka dadka magaalada Seattle ayeey magaaladuna isbadaleysaa, Magaaladuna waxey u baahantahay in ay dib u eegt oo ballaarsa dadaallada ka qaybgalka dadweynaha si ay u hubiyaan in kooxaha joqoraafi ahaan kordhaya dadkooda matalayo ay ka qeybgalaan geedi socodka go'aan magaaladu qaadaneyso si loo baabiyo caqabadaha dadka niyad jabka ku reebaya.

July 2016, Duqa Magaalada Murray waxuu saxiixay Amar Fulin 2016-06 iyadoo ay ka go'antahay in uu hormariyo hirgelin dhab ah ee loo simanyahay iyo ka mid ahaanshaha howlaaha statejijiyadaha magaalada waaxyaheeda oo idil. Bishii November, iyadoo ay qayb ka aheyd geedi socodka miisaaniyadda 2017-2018, Golaha Degaanka waxey gudbiyeen sharci rasmi ah oo abuuraya in Duqa Magaaladu gaar, mabaadiida lagula xiriirayo iyo sida bulshada loo hawlgelinyo, waxuuna tusaleynayaa, qaabka cusub ee hawlgelinta bulshada, iyo abuurista Komiishin Ku Howlan Arrimaha Bulshada. Komishinka cusub waxuu la- talin doona oo hogaaminayaa Waaxaha Magaalada dadaalkooda si ay u horumariyaan, u fuliyaan, iyo in la helo wanaag dhab ah oo dhamaystiran i loo gaaro oo ay uga faa'iideysan dhammaan dadka deggan Seattle.

Ujeedo, Goolal, iyo Qaabdhismeedka

Waa Maxay Ujeedada Komishinka ku Howlan Arrimaha Bulshada?

Komishinka ku Howlan Arrimaha Bulshada waxuu la talinayaa Waaxda Derisyadda ee Seattle iyo waaxyaha kale ee Magaaladda xiriirinta iyo gaarista magaalada oo dhan iyo dhaqdhaqaaqa hawlgelined.

Waa maxay goolashoodu?

1. In ay bixiyaan talo ku saabsan mudnaanta, siyaasadaha, iyo stratejiyadaha la xiriira ka qaybqaadashada sinnata bulshada ee arrimaha madaniga ah, iyo ka qaybgalka dadweynaha ee geeddi socodka iyo go'aanada ay qaadaneyso Magaaladu. Tani waxaa ka mid ah dib u eegista dadaallada, stratejiyadaha, iyo soo jeedinta ay magaaladu soo bandhigto, iyo sidoo kale kuwa ay Komiishinku aqoonsadan.
2. In ay siiyaan jawaab-celin ku saabsan horumarinta qorshaha ka qaybgalka bulshada ee Waaxyaha Magaalada qaabilsan qorshayaasha ku howlan bulshada, iyadoo diirada la saarayo hirgalin dheraad ah ee stratejiyada ka qeybgal siman, lana aqoonsado siyaabo cusub, si loo kordhiyo ka qaybgalka bulshada rayidka ah, geedi socodka Magaalada.

3. Horumarinta iyo xilliyada is-badelka xeerarka iyo qorshaha shaqo, weeye awood Komiishinka iyo in ay fuliyaan shaqada, hormariyaana barnaamijka iyo talooyinka siyaasadda ee la soo jeedinayo in ay waafaqsan yahiin hadafka Komiishinka.

Sidee loo habeyn doonaa?

Komiishinku wuxuu yeelan doonaa 16 xubnood. Shaqsiyaadka jagooyinka 1 ilaa 7 waxaa magacaabaya Golaha Degaanka, taas oo u dhiganta jagada lambarka Xubinta Golaha Degaanka uu ku fadhiyo in uu magacaabo. Shaqsiyaadka jagooyinka 8 ilaa 14 waxaa magacaabaya Duqa Magaalada, iyadoo booska 14 uu buuxinayo qof dhalinyaro ah, waxaana loo marayo barnaamijka qeybgelinta Magaalada ee loo yaqaan ku lug yeelo. 14 kaas xubnood waxaa ansaxinaya oo cod aqlabiyad ah u codeynaya Xubnaha Golaha Degaanka. Xubnaha jagooyinka 15 iyo 16 waxaa xulan doona Komiishinka iyadoo uu ogolaanayo Duqa Magaalada, waxaana ansaxinaya Xubnaha Golaha Degaanka.

Wareega hore ee ballamaha, jagooyinka tirada lambarkoodu yahay kisi waxey adeegi doonaa hal sano, jagooyinka lambarkoodu yahay dhaban waxey adeegi doonaan laba sano. Ka dib markii ay dhameystaan mudada ugu horesa, waxaa ku xigi doona in qof kasta uu adeegi doono laba sano, inta aan ka ahey jagada ku lug yeelo”Get Engaged position “ , taas oo socon doonta mudo hal sano ah. Xubnaha Komiishinku ma adeegi doonaan laba xili wax ka badan. Iyadoo laraacayo codka badan, Komiishinku waxuu sanad walba dooran doonaan mid ama ka badan xubnaha, si ay u noqdaan shir gudoon.

Xubnaha Komiishinku waxey u adeegi doonaa si tabaruc ah waxaana laga codsanayaa in bixiyaan wakhtigooda siiyaan qiyaastii saddex ilaa lix saacadood bishiiba.

Wixii su'aal ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Guddiga Involvement Community, nagala soo xiriir Danielle.Friedman@seattle.gov, (206) 256-5973